

IIB MA GALO

FAAFIN

الرسومية



RASMI AH

جريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad

Muqdisho, 12 Nofember 1975

L. 1 R. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

EAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddeedan waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 69 ee 19 Oktoobar 1975 — *Wax ku kordh Sharci Lamb. 1 taarikh 6 Disheember 1974, Nidaaminta Maamulka Hawlaha G.S.K. iyo Madaxtooyada.*

Bog. 851

SHARCI L. 70 ee 19 Oktoobar 1975 — *Beddeelaad Xeerka Habka Madaniga qod. 250.*

» 853

LEGGE N. 70 del 19 Ottobre 1975 — *Modifica dell'art. 250 del Codice di Procedura Civile.*

» 854

SHARCI L. 71 ee 25 Oktoobar 1975 — *Meelmarin Heshiis.*

» 855

SHARCI L. 71 ee 25 Oktoobar 1975 — *Nuqul Carabi ah.*

» 856

BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, 19 Oktobar 1975, L. 150 — <i>Rugsad Baaris Saliid.</i>	Bog. 857
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, 19 Oktoobar 1975, L. 151 — <i>Oggolaansho Rugsad.</i>	» 857
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, 19 Oktoobar 1975, L. 152 — <i>Magacaab.</i>	» 858
XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA- CAANKA, 21 Oktoobar 1975, L. 153 — <i>Awood Siin.</i>	» 860
XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29 Jennayo 1967, L. 154 — <i>Concessione e conseguente libera Di- sponibilità di area di terreno demaniale a favore del Sig. Omar Mohallim Mohamed Farah.</i>	» 861
XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 14 Maggio 1973, L. 155 — <i>Siiismo dhul Dowladeed la siyey, Società Cooperativa Edilizia «Rugteyda».</i>	» 863

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3 Jun. 1975 — <i>Naada Dhul, Jaalle Maxamed Warsame Maax.</i> (252)	Bog. 864
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20-10-1975 — <i>Naada Dhul, Jaalle Cabdulxamiid Sheekh Cumar.</i> (253)	» 865
MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, 16-10-1975 — <i>Lumid jeeg L. 6004 — Sh. So. 1.000 u leyhay Jaalle Ismaciil Xaaji Warsame.</i> (254)	» 865
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11-11-1975 — <i>Lumid Jeegga W. L. 9903, So. Shs. 8.000 u leyahay Cumar Xaaji Cali Cumar.</i> (254 Bis)	» 866
MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, 10-11-1975 — <i>Lumid Buugga Lacagta L. 293, So. Shs. 14.871,05 u leyhay Xasan Macow Cali.</i> (254 Bis)	» 866
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 13-11-1975 — <i>Lumid buugga lacagta L. 667-4, So. Shs. 1900 u leahay Xasan Sheekh Cabdi.</i> (254 Bis)	» 867
MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15-11-1975 — <i>Lumid laba Jeeg wareega lamb. 5.906 - 5.907, So. Shs. 50.000 - 47.400 ay ledahay Wakaaladda Muuska. (254 Bis)</i>	» 868

BOGGA KOWAAD

SHARCI L. 69 ee 19 Oktoobar 1975.

Wax ku kordhin Shorci Lamb. 1, taarikh 6 Disheember 1974 — Nidaaminta Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada.

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAYA Go' aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayeyaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Xubinta 2 ee Qod. 1aad ee Sharciga tirsigiisu yahay 1. taariikh tahay 6 Disheember 1974 iyo beddelaadii ka dambeeyay kuna saabsanaa «Nidaaminta Maamulka Hawlaha Golaha Sare ee Kacaanka iyo Madaxtooyada, waxaa lagu kordhiyay xarafka (J) oo loo akhri doono sida soo socota;

J) — Gaar ahaan Guddiga Dhaqaalaha waxaa xubin ka noqon doonaan:

1. — Xoghayeyaasha Dawladda ee Maaliyadda iyo Ganacsiga;
2. — Madaxa (Guddoomiyaha ama Taliyaha) Bankiga Dhexe, Ganacsiga iyo Horumarinta

Qodobka 2aad

Qod. 3aad ee Sharciga tirsigiisu yahay 1 taariikh tahay 6 Disheember 1974 iyo beddelaadii ka dambeeyay waxaa lagu kordhiyay Xubin laabaa oo loo akhriyi doono sida soo socoto:

2. La-Taliyayaasha Dawladda heerkoodu waa kan Xoghayayaasha oo kale.

Qodobka 3aad

Qod. 6aad ee Sharciga lamb. 1 taariikh 6 Disheember 1974 iyo beddelaadii ka dambeeyay, waxaa lagu kordhiyay Xubin 4aad oo loo akhrin doono sida soo socda:

4. b) Talo ka-bixinta, go'aan qaadashada iyo ammar ka dhiibka wixii ərrina ee ku saabsan maal-gelinta, mashaariicda iyo Siyaasadaha Dhaqaalaha, taas oo ay ku jirto Qorshayntu;
- t) Wax alla wixii maal-gelin iyo Siyaasad cusub ama bedde-laad ah ee dhaqaalaha ah waa in Guddidu deristaa, qorshaysaa, talana ka dhiibtaa iyadoo Madaxweynaha G.S.K. hor-dhigaysa intaan Golayaasha la geyn si go'aan looga gaadho.

Qodobka 4aad

Xubinta 3aad iyo 4aad ee Qod. 11 sharciga tirsigiisu yahay 1 taa-riikhdiisuna tahay 6 Dishember 1974, waa la beddelay, waxaana loo akhriyi doona sida soo socda:

3. Guddi kastaa waa inuu u gudbiyaa Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka Go'aannada, warbixinta iyo ammarrada uu bixiyo iyagoo qoran oo uu saxeexay Guddoomiyaha Guddigu;
4. Warbixinta, Go'aannada iyo ammarrada Guddiyadu bixiyaan waa in la hordhigaa Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xogha yeayaasha Dawladda.

Qodobka 5aad

Sharciga wuxuu dhaqan gelayaa maalinta lagu qoro Faafinta Rasmi-ga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOOMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxmaed Siyaad Barre

SHARCI L. 70 ee 19 Oktoobar 1975.

Beddelaad Xeerka Habka Mdaniiga qodobkiisa 250.

GUDDOONSHAH

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO TIXGELINAAHA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo
ka Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Saxiixa Rafcaanka Maxkamadda Sare

Xubinta 1aad ee qodobka 250 ee Xeerka Habka Madaniga, waa la
beddelay, waxaana loo akhriyi doonaa sida soo socota:

« Rafcaanka loo qaadanaayo Maxkamadda Sare waaxaa saxiixa kara
rafcaanlaha oo haddii uu doono isaga iska daafici kara Maxkamadda Hor-
teeda ama qareenka u doodaayo waana in ay ka muuqataa rafcaankiisa».

Qodobka 2aad

Burin

Sharci kasto oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan
waa la buriyay.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa dhaqs,i waxaana lagu qori doonaa
Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAH

GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

LEGGE L. 70 del 19 Ottobre 1975.

Modifica dell'art. 250 del Codice di Procedura Civile.

GUDDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA

PRESO ATTO dell'approvazione del Consiglio Rivoluzionario Supremo e del Consiglio dei Segretari di Stato;

PROMULGA

la seguente Legge:

Art. 1

Sottoscrizione del ricorso

Il primo paragrafo dell'art. 250 del Codice di Procedura Civile e' modificato, ed e' letto come segue:

«Il ricorso alla Corte Suprema può essere sottoscritto dal ricorrente che può difendere se stesso davanti alla Corte oppure dal difensore che lo rappresenta, e deve contenere».

Art. 2

Norme abrogate

Ogni legge o disposizione contraria o incompatibile a questa Legge e' abrogata.

Art. 3

La presente Legge entra in vigore immediatamente e sarà pubblicata sul Bollettino Ufficiale dello Stato.

Mogadiscio, 19 Ottobre 1975.

IL PRESIDENTE
del Consiglio Rivoluzionario Supremo
Magg. Gen. Mohamed Siad Barre

SHARCI L. 71 ee 25 Oktoobar 1975.

Meelmarin Heshiis.

GUDDOMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Heshiiskii dhemaray Dawladda Soomaaliya iyo ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiskii dhermaray Dawladda Soomaaliya iyo Dawladda Liibiya oo ku saabsan deyn 2.000.000 dinaar;

ISAGOO TIXGELINAYAA Go' aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAY
Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Heshiiskii deyn 2.000.000 oo dhexmaray J.D.S. iyo J.A.L. oo ku saabsan dhamestirka Gegida Dayuuradaha ee Kismaayo oo lagu kala saxeexday 26 Junyo 1974, waa la oggolaaday.

Qodobka 2aad

Heshiiskan wuxuu yeelanaya astan sharci wuxuuna ka mid noqonayaa Sharciyada Dalka u yaalo sida ku qoran qodobkiisa 8aad, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Oktoobar 1975.

GUDDOMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

الموضوع : تصديق الاتفاقية المبرمة بين الجمهورية الديمقراطية الصومالية وجمهورية العربية الليبية الخاص بتقديم لاتمام بناء ومطار كسمايو الدولي :

رئيس المجلس الأعلى للثورة

بعد الاطلاع : على ميثاق الأول والثاني للثورة ٢١ أكتوبر ١٩٦٩

بعد الاطلاع : على الاتفاقية بين الجمهورية الديمقراطية الصومالية والجمهورية العربية الليبية المبرمة في ٩ يونيو ١٩٧٤ الخاصة بتقديم من جانب الحكومة الليبية قرض قدره ٢ مليون دينار ليبي إلى الصومال وذلك لاتمام بناء مطار كسمايو الدولي .

ونظراً : أن مصلحة الدولتين الشقيقتين التعاون في الميدان الاقتصادي

ونظراً : لقرار مجلس قيادة الثورة والسكرتيرين تاريخ ١٩ يونيو ٧٥

يصدر القانون التالي

مادة : ١

لقد تم التصديق على الاتفاقية المبرمة بتاريخ ٢٦ يونيو ١٩٧٤ بين الجمهورية الديمقراطية الصومالية والجمهورية العربية الليبية الخاصة بتقديم من جانب ليبيا إلى الصومال قرض قدره ٢ مليون دينار ليبي وذلك لاتمام بناء مطار كسمايو الدولي .

ان الاتفاقية المذكورة تكون لها صفة شرعية في الجمهورية الديمقراطية الصومالية وتعد من القوانين الجاربة في الصومال .

مادة : ٢

يسري مفعول سريان هذا القانون حال ما يمضى عليه الرئيس المجلس الأعلى للثورة لقيادة مجلس الثورة في الجريدة الرسمية للدولة .

مقدышو في ٧٥/٩/١

اللواء محمد سياد برى

رئيس المجلس الأعلى للثورة

BOGGA LABAAD

XEER L. 150 ee 19 Oktoobar 1975.

Keer lagu oggolaaday cusbooneysiin Ruqsad Baaris Saliida ee Sharikadda «Elf Somalia».

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Go'aankii G.S.K. iyo kan Xoghayayaasha ee lambarkiisu ahaa XGX 16-200-75, taariikhdiisuna ahayd 27-9-75.

WUXUU XEEREYNAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in Sharikadda «Elf Somalia» loo cusbooneysiyo muddo hal (1) sano ah ruqsadda Baarista saliida, ka bilaabato 1 Diisembar 1975, kuna dhammaaneysa 30ka Noofembar 1976.

Qodobka 2aad

Xeerkana waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SAHE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER L. 151 ee 19 Oktoobar 1975.

Oggolaansho Rugsad.

GUDDOONSHAHAA GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo tan Xoghayayaasha ee taariikhdiisu ahayd 25 Sebtember 1975;

WUXUU XEEREYNAYAA

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la siiyo Sharkadda «Elf Somalia» ruqsad wax lagu qodo ee labo (2) sano ah, kana billaabaneysa 1 Oktoobar 1975, kuna dhammaaneysa 30 Sebtember 1977 kuna fadhida bad baddeedu tahay 500 mayl oo afar geeska ah oo ka mid ah dhulka 3616 mayl oo afar geeska ah ee ay Sharikaddu haysato.

Qodobka 2aad

Xeerkana waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SAHE EE KACAANKA

XEER L. 152 ee 19 Oktoobar 1975.

Magacaabid.

GUDDOONSHAHAA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21
Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. 1, taariikh. 6 Dishembre 1974
iyo Sharciga ka dambeeyay taariikhdiisu ahayd 17 Agoosto 1975 kuna
saabsanaa Guddiyada G. S.K.;

ISAGOO AKRAY Qod. 1aad iyo kan 3aad ee Sharciga lamb. 1 taa-
riikh. 6 Dishembre 1974 iyo Qod. 3aad ee Sharciga, taariikh. tahay 17
Agoosto 1975;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Guddiga Dhaqaalaha lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay 1 taa-
riikhdiisuna tahay 6 Dishembre 1974 iyo beddelaadii ka dambeeyay, wu-
xuu ka koobnaan doonaan Jaalleyaasha hoos ku magacaaban:

GUDDIGA DHAQAALAHAA

- | | |
|--|------------|
| 1. Jaalle S. Gaas Xuseen Kulmie Afrax, ka tirsan
G. S. K. | Guddoomiye |
| 2. Jaalle G. Sare Maxamed Cali Shire, ka tirsan
G. S. K. | Xubin |
| 3. Jaalle G. Sare Muuse Rabiile Good, ka tirsan
G. S. K. | Xubin |
| 4. Jaalle G. Sare Axmed Xasan Muuse, ka tirsan
G. S. K. | Xubin |
| 5. Jaalle G. Dhexe Cusmaan Maxamed Jeelle, ka
tirsan G. S. K. | Xubin |
| 6. Jaalle Dr. Maxamed Warsame Cali (Kimiko),
La-Taliye Daw. | Xubin |

- | | |
|---|-------|
| 7. Jaalle Dr. Ibraahim Meygaag Samatar, La-Taliye Dawladeed | Xubin |
| 8. Jaalle Dr. Cumar Saalax Axmed, La-Taliye Dawladeed | Xubin |
| 9. Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax, La-Taliye Dawladeed | Xubin |
| 10. Jaalle Dr. Axmed Maxamed Maxamuud, Xogayaha Ganacsiga | Xubin |
| 11. Jaalle Dr. Cabduraxmaan Nuur Xirsi, Xogayaha Maaliyadda | Xubin |
| 12. Jaalle Dr. Cumar Axme dCumar, Taliyaha Bantiga Dhexe | Xubin |
| 13. Jaalle Dr. Maxamuud Jaamac Axmed, Guddoomiyaha Bank. Hor. | Xubin |
| 14. Jaalle Sheriif Zeyn, Guddoomiyaha Bank. Ganc. | Xubin |

Qodobka 2aad

Yeerkann wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Oktoobar 1975.

GUDDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER L. 153 ee 21 Oktoobar 1975.

Awood Siin.

GUDDOONSHABA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Xeerka tirsigiisu yahay 3 ee soo baxay 10kii Jannaayo 1970kii oo lagu dhisay Maxkamadda Badbaadada Dalka;

MARKUU ARAY Xeerkii lagu toosiyey dhisidda Maxkamadda Badbaadada Dalka ee tirsigiisu yahay 7, soona baxay 21kii Jannaayo 1970kii;

MARKUU ARKAY Qodobka koowaad ee Xeerka tirsigiisu yahay 29 ee soo baxay 12-3-1975, oo ah siyaado lagu sameeyey qodobka koowaad ee Xeerka tirsigiisu yahay 52, soona baxay 1-9-1970;

WUXUU GOOYHEY

Qodobka 1aad

Waxaa awood la siinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, hadduu maqan yahayna ku xigeenkiisa, in uu magacaabi karo Garsoorayaal ka tirsan Maxkamadaha Caadiga ah, in ay ka noqdaan M.B.D. Lataliyeaal ku meel gaar ah «Consiglieri Aggiuntivi».

Xeerkaan wuxuu dhaqan geli doonaa marka la saxeexo, waxaana lagu dari doonaa Ururka sharciyada J.D.S., ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Oktoobar 1975.

GUDDOONMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

XEER L. 154 ee 29 Gennaio 1967.

Concessione e conseguente libera disponibilità di area di terreno demaniale a favore del Sig. Omar Mohallim Mohamed Farah.

IL SEGRETARIO DI STATO

VISTI gli articoli n. 77 e n. 83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D. L. 7 Febbraio 1965, n. 1, «modificazione alla Legge 3 Giugno 1962», relativa all'Ordinamento del Governo;

VISTO il D. A. 13 Settembre 1956, n. 99 di Rep.;

VISTO il D. A. 13 Settembre 1956, n. 115 di Rep.;

VISTO il D. P. R. 23 Maggio 1961, n. 144;

VISTO l'Ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950;

VISTA la domanda in data 16 Febbraio 1958, presentata dal Sig. Omar Mohallim Mohamed Farah intesa ad ottenere in concessione a scopo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio — nei pressi della Moschea Scek Sufi — Ricade nella zona IV Sub-Centrale;

CONSIDERATO che, l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta e' rimasto affisso a termini di Legge all'albo del Municipio di Mogadiscio, ed e' stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia n. 6 del 1 Giugno 1958, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto n. 6933 concernente la costruzione di un edificio in muratura che e' stato approvato a suo tempo dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 239° seduta del 2 Luglio 1959;

VISTO il progetto n. 9157 variante al progetto n. 6933 approvato dalla Commissione Edilizia di Mogadiscio nella sua 260° seduta del 29 Settembre 1960 e concernente la costruzione di un edificio ad uso di abitazione;

VISTE le bollette dell'Ufficio Tasse sugli Affari n. 461 in data 27 Ottobre 1958 dell'importo di Shs. So. 300 e n. 51689 in data 2-2-1966 dell'importo di Shs. So. 1.200, con le quali il Sig. Omar Mohallim Mohamed Farah ha pagato in complessivo la somma di Shs. So. 1.500, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO che l'area di terreno richiesta di mq. 600, e' stata consegnata al Sig. Omar Mohallim Mohamed come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 4 Aprile 1959;

VISTA la 2° domanda in data 9 Maggio 1962, presentata dal Sig. Omar Mohallim Mohamed con la quale viene richiesto in concessione a scopo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio, nei pressi della Moschea Scek Sufi in ampliamento alla concessione originaria, Ricade nella zona IV Sub-Centrale Transitoria;

CONSIDERATO che, l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta in ampliamento e' rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio — ed e' stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia Suppl. n. 2 al n. 5 del 20 Maggio 1963, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un muro di recinzione in muratura che e' stato approvato dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 321° seduta del 28 Ottobre 1963;

VISTA la bolletta n. 17827 in data 7 Novembre 1963, dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestante che il Sig. Omar Mohallim Mohamed ha pagato la somma di Sh. So. 1.996, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in ampliamento a scopo edilizio;

CONSIDERATO che, l'area di terreno richiesta in ampliamento di mq. 499, e' stata consegnata al Sig. Omar Mohallim Mohamed, come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 14 Novembre 1963;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;

VISTO il verbale di accertamento in data 23-1-1967, dal quale risulta che la costruzione di cui al progetto approvato dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio in data 29-9-1960 e' stata realizzata conformemente al progetto stesso;

VISTO il Nulla Osta di abitabilità dello stabile costruito in Mogadiscio nei pressi della Moschea di Scekh Sufi, rilasciato dall'Amministrazione Municipale di Mogadiscio, con foglio n. 775 di Prot. in data 24 Febbraio 1966;

CONSIDERATO che sono stati adempiuti tutti gli obblighi normalmente imposti per la concessione e la conseguente libera disponibilità dell'area di terreno demariale a scopo edilizio;

DECRETA:

E' riconosciuta a favore del Sig. Omar Mohallim Mohamed Farah la concessione e la libera disponibilità dell'area di terreno demaniale di mq. 1.099, sito in Mogadiscio, nei pressi della Moschea di Scekh Sufi.

Mogadiscio, 29 Gennaio 1967.

IL SEGRETARIO DI STATO ai LL.PP.

Mohamed Ali Dorre

VISTO e registrato, Reg. n. 1, foglio n. 53

Mogadiscio, li 10 Ottobre 1967.

Il Magistrato ai Conti:

Mohamed Ahmed Abdilleh

XEER L. 155 ee 14 Majio 1973.

Siismo dhul Dowladeed la siyey Società Cooperativo Edilizia «RUGTEYDA».

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashiddi Kowaad iyo tii labaad ee Kaacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qorteen Società Cooperativa Edilizia «RUGTEYDA» taarikhdeeduna ahayd 21-4-1959 kuna yaal Xaa-fadda Lenin;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka ee lagu dhejiyay Xafiiska ku shaga lahaa laguna dhaabacay xaashida Rasmiga ah ee Dowladda lamb. 2-6 taarikhdeeduna ahayd 6-6-1959;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu ahayd L. 1826 taarikhdeeduna 18-3-1960 oo kū qoran «Società Cooperativa Edilizia «RUKTEYDA» uu dhiibeam Xafiiska Canshuurta Dawladda lacag tiradeedu tahay Sh. So. 13.074,00;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshada ku saabsan siismaha dhulka lambarkeeda yahay 1011051 in Shiirkada kor ku magacaaban la siiyey dhul ku fadhiyay 130.740, taarikhdeeduna ahayd 8-12-1960;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynuunka dhulka iyo naqshadda oo tiilmameuso isaga ah;

AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in «Società Cooperativa Edilizia «RUKTEYDA» la siiyey dhul Dawladeed ee ku fadhiya 130.740 mdh. kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Lenin.

Muqdisho, 14 Majio 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.
G.le Sare Maxamed Sheekh Cismaan

VISTO e Registrato - Reg. n. 1, Foglio n. 27.

Mogadiscio, li 27 Maggio 1973.

Il Magistrato ai Conti:

Magg. Abdullahi Warsame Nuur

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Dadweynaha dagmada B. Weyne waxaa leydin ogeysiinaya inuu Jaalle Maxamed Warsama Maax, uu Xafiiska kan keenay arji uu ku weydiisanayo roqsad milki ah in loogo oggolaado cad dhul ah uu degganyahay kuna yaal B. Weyne, Xaafadda Xaawa Taako-Laanta Liibaan, dhulkaas oo la xu duud ah, Bari Waddo; Balbeed Beydan Kulmiye, Waqooy Waddo; Koonfur, Xasan Caalim Maxamed.

Ruux kasta ee dhulkaas dacwad ka qabahi waa inuu soo qadimo dacwad inta aysan dhamaan 30ka Maalmood ee ogeysiiska kani uu ku dhegsanyahay xafiiska kan (Albo Municipale) B. Weyne Waqtigaa oo ka billaabnayaa maanta 3-6-1975 kuna dhamaan doonta 2 Bisha Luuliyo 1975.

Muddada aan soo sheegnay iyo wixii ka dambeya ruux allale ruuxi dacwad keena lagama makhli doono ee waa inta 30ka Maalmood ka horeisay inuu soo Qadimo dacwada ka horjeeda dhulka aan soo sheegay.

B. Weyne, li 3-6-1975.

Guddiga Kacaanka Degmada Belet Weyne

Guddoomiyaha

G.le Maxamed Cartaan Cismaciil

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeeynaya in Jaalle Cabdulxamiid Sheekh Cumar, u usoc qortay arji qybtta Dhismaha iyo Dhulka 20-3-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Cabdulcasiis, oo leh qiyaas rettangolaar 30x21, kuna fadhiya 360 mdh.

Soothdin:

Waqooyi Waddo.
Koofur Dhul.
Galbeed Waddo.
Bari Waddo.

Qofkii dannaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Ha Guud, dhulk waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Oktoobar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Inj. Caydaruus C. Keenadid

(253)

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE

Dakereeto ku saabsan jeeg wareego oo lumey

GARSOORE

HADDUU ARKAY Dalabka Jaalle Ismaaciil Xaaji Warsame oo ku saabsan jeeg wareega oo ka lumey Lamb. 6004 ee 2-7-1975 oo ka baxay Bankiga Ganacsiga Ummadda ee Marka oo ku qorneed lacag tirsigeedu gaaraayo 1000 (kun) shilin;

MADDUU ARKAY Qodobka 69 iyo 82 Xeerka Lam. 2 ee 9-9-1965;

HADDUU HUBSADEY In ay run tahay lumidda jeega kor ku tilmaaman yahay:

WAXUU AMRAYA

In loo sameeyo jeeg kale (duplicate) markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalintii lagu qoro faafin rasmi ah, haddii cid kale aan soo hor istaagin.

Marka, 16 Oktoobar 1975.

GARSOORE
Axmed Ibrahim Maxamed

MAXKAMADDA GOBLKA BANAADIR

GARSOORAH MAXKAMADDA

HADDU arkay weydiin horay ku qoran.

MARKUU ogaaday wax ay ku saabsan tahay arkayha Ogeysiis ki Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Sedaxaad, eeg waq. lam. 1677), wux uu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qab. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEEYNAYA

Lumida Jeegga wareega ee lamb. 9903 oo ay ku qorneyd Shs. 8.000 (Sideedkun) iskana lahaa Cumar Xaaji Cali Cumar.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameyo ninka kor ku magacaaban jeeg cusub 15 beri kadib markii lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub la sameyn doono gacanta laga saaro Cumar Xaaji Cali Cumar ama qof asaga ka sita wakaalad Sharci ah ayad oo la sugaayo mudada 15ka beri ah ee kor lagu soo shaagay.

Xamar, 11-11-1975.

GARSOORAH MAXKAMADDA
Cabdullaahi Daahir Barre

(254 Bis)

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE

GARSOORAH MAXKAMADDA

HADDII UU ARKAY Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Macow Cali, 36 jir ah oo ku taariikheysan 10-11-1975, kasoo ku weydiistsay in loo jadiidiyo libreeto uu ka lumey oo lamb. 293 oo ku qoran lacag tirsigeedu gaaraayo 14871,05 (afariyotobankun sideed boqol kow iyo todobaa-tan iyo shan senti) Shilin;

HADDII UU ARKAY Xeerka Lambarkiisu yaha 2 soona baxay 9-9-1965;

HADDII UU HUBSADA YIn ay run tahay lumidda libreetaha kor ku tilmaaman yahay;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo libreeto kale (duplicate) Jaalle Xasan Macow Cali 15 maalmood laga billabo maalintii lagu qoro faafinta rasmiga ah.

Marka, 10-11-1975.

GARSOORE
Armed Ibrahim Mayamed

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAH MAXKAMADDA

HADDUU Arkay dacwada horay ku qoran;

MARKUU ogaaday waxa ay ku saabsan tahay arkayna ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta sedexaad (eeg. warq. lam. 1691) wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda bug keydka lam. yahay 667-4 kuna qornay lacag dhan Shs. 1900 (kunsagaalboqol) iskana lahaa Xasan Sheekh Cabdi Maxamud.

XUWUU AMRAYAA

In Xasan Sheekh Cabdi Maxamuud loo sameeyo buug keyd cusub 30 maalmood ka dib markii Amarkan lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Xasan Sheekh Cabdi Maxamuud ama qof isla asaga ka sita Wakaalad Sharci ah.

Xamar, Tr. 13-11-1975.

GARSOORAH MAXKAMADDA

Cabdullaahi Daahir Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORUHU

HADDUU arkay dalabdkii Wakaaladda Mooska Ummadda;

HADDUU arkay warqadii laga soo qoray Bankiga Ganacsiga Ummadda taasoo ku lambareysneyd 34502 dhahaysayna in Wak. ay ka luntay laba jeeg oo Wareega lambar: 5906, 5907 ayna ku yaaliin lacag dhan 50.000 47.400 Shs. So.

HADDU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAAYAA

Iney sax tahay lumidda labadaas Jeeg oo lambaradoodu kor ku qoran yihiin ayna isku jir ahaan ku taal lacag dhan 97.400 Shs. So. ayna leeda-hay Wakaaladda Mooska Ummadda, sidaas awgeed;

WAXAA LA AMRAAYAA

In markaan lagu dhigo faafinta rasmiga ah (Bollettino Ufficiale).

WAXAA KALOO LA AMRAAYAA

In loo sameeyo laba Jeeg oo cusub, 30 beri ka bacdi markii lagu dhigo faafinta rasmiga ah. Buugtaas waxaa lagu dhigaayaa Wakaaladda Mooska Ummadda.

Xamar, 15-11-1975.

Gudoomiyaha Maxkamadda G. B.

Cabdulahi Daahir Barre

(254 Bis)